# S & J: Jaris ku xakumidda iyo Jarista Geedka Sida Gaarka ah Loo Leeyahay ee Gudiga Madadaalada iyo Beeraha ee Minneapolis

Waxaa diyaariyay 12/8/2022

Guddiga Madadaalada iyo Beeraha Minneapolis (MPRB) ayaa kormeereen, jarisna ku xakumeen, jareenna oo na qiimeeyeen geedaha jirran ama bahaladu galeen ee kuyaala guryaha gaarka ah iyaga oo isticmaalaya kharashka mulkiilaha in ka badan 50 sano. Dhawaan, xubnaha dadweynuhu waxay weydiiyeen su'aalo ku saabsan awoodda MPRB ee ah inay qabato shaqadan; habka ay u xakumeyso jarrida geedaha; iyo sida ay ula xiriirto milkiilayaasha guryaha oo saabsan fursadaha lagu jarayo geedaha lagu xukumay jaris iyo bixinta kharashaadka jarista ee laga yaabo in la qiimeeyo.

## Oggolaanshaha

S: Sharcigee, qaanuunkee ama xeerkee u ogolaanaya Guddiga Beeraha in ay jaris ku xakumaan geedaha ku yaal guryaha gaarka ah?

J: Awoodda MPRB ee ah inay jaris ku xakunto oo ay jarto geedaha jirran ama bahaladu galeen ee ku yaal guriga gaarka ah ee magaalada Minneapolis waxaa lagu bixiyay Qaanuunka Minnesota cutubka 18G.13 Xakamaynta Cayayaanka Maxalliga ah, Qaanuunka Minnesota Cutubka 429.101 Dallacaadda Gaarka ah ee Lacag aan La Bixin ayaa noqon karta Qiimayn Gaar ah, iyo Xeerka Xeerarka MPRB Cutubka 10-aad – Geedaha iyo Dhirta. (Minnesota Statute Chapter 18G.13 Local Pest Control, Minnesota Statue Chapter 429.101 Unpaid Special Charges may be Special Assessments, and MPRB Code of Ordinances Chapter 10 – Trees and Vegetation.)

S: Muddo intee in le'eg ayey sharciyadan iyo qaanuunadan ay jireen?

J: Tan iyo markii la aasaasay Guddiga Beeraha 1883-kii, waxay awood u leedahay - sharci ahaan ama cutubka magaalada Minneapolis - oo ku saabsan beeraha iyo dhirta ee gudaha Minneapolis. Sannadkii 1969-kii, sharci-dejinta gobolka ayaa si gaar ah u dejiyay sharci sheegaya in guddiga baarkinku uu leeyahay mas'uuliyadda ilaalinta iyo xakamaynta cayayaanka iyo cudurrada. Xeerarka MPRB waxaa la cusboonaysiiyay 2009-kii si loogu diyaar garoobo geedaha gaarka ah ee uu galay Emerald Ash Borer.

## Taariikh

Tan iyo markii la bilaabay xakameynta cayayaanka geedaha soo weerara, MPRB waxay meesha jartay in ka badan 200,000 oo geed oo buka ama bahalo galeen oo ku yaal dhulka dadweynaha iyo kuwa gaarka ah labadaba.

S: Maxay MPRB jaris ugu xukumaysaa una jaraysaa geedaha?

J: Geedaha dawliga ah iyo kuwa sida gaarka loo leeyahay ayaa jaris lagu xukumaa, loona jaraa sababo kala duwan awgood, waxaana ka mid ah in geedku yahay:

- Mid dhintay and Dhimanaya

- Geed qaab dhismeedkiisu khatar yahay
- Waxaa galay bahalo aad u dhaawaca geedka sida Emerald Ash Borer (EAB)
- Waxaa ku dhacay cudur sida Disease Elm Dutch (DED)

Taariikh ahaan, habalada geedka gala iyo cudurrada ayaa sababay in jaris lagu xakumo inta ugu badan geedaha Minneapolis. Tan iyo markii ugu horreysay ee EAB laga helay Minneapolis 2010=kii, in ka badan 50,000 oo geedo dambas ah oo dadweynaha iyo kuwa sida gaar ah loo leeyahay ayaa la jaray si loola dagaallamo bahalo galeenka, kaas oo dilaa u ah dhammaan geedaha dambaska ah. Waaxda Kaymaha ee MPRB ayaa ka shaqaynaysay in ay si habaysan u bedesho dhammaan geedaha dambaska ah ee dadweynaha ee Minneapolis iyada oo la adeegsanayo noocyo kala duwan oo geedo kale ah si loo sameeyo kayn magaalo oo adkeysi leh loogana ilaaliyo jiilalka mustaqbalka inay soo maraan khasaare la mid ah.

## Habka Kormeerka Geedka, Jarista, iyo Lacag Bixinta

Shaqaalaha Waaxda Kaymaha ee MPRB ayaa si joogto ah u kormeeraan geedaha guud iyo kuwa sida gaarka ah loo leeyahay dhammaan Minneapolis. Waxay jaris ku xakumeen geedaha buka ama bahalku galay ee hantida gaarka ah ee u baahan jaris waxayna ogeysiiyaan mulkiilayaasha/cashuur bixiyayaasha iyagoo kaga tagaya albaabka macluumaadka guriga iyo inay ugu diraan ciwaanka mulkiilaha warqad ogeysiin ah Adeegga Boostada Maraykanka. (Fiiro gaar ah: dhammaan macluumaadka mulkiilaha/cashuur bixiyaha waxaa laga helay keydka macluumaadka guryahad degmada Hennepin.)

Ogeysiiska waxaa ku jira macluumaad ku saabsan xulashooyinka iyo waqtiga la jarayo geedka. Milkiilayaasha guryaha ayaa haysta 20 maalmood si ay uga jaraan cirifka buka iyo 60 maalmood si ay u suuliyaan geedaha dambaska ah ee bahaladu galeen. Iyadoo ku xiran xaalado gaar ah, milkiilayaasha guriga ayaa la xiriiri karaan shaqaalaha adeegga macaamiisha Kaymaha si loo gu kordhiyo waqtiga kama dambaysta ah ee jaritaank geedka.

Ikhtiyaarada jarista geedka waa in mulkiilaha guriga isagu iska jaraa oo uu shaqaaleysiiyaa qandaraasle isaga u gaar ah ama uu haysto qandaraaska MPRB ee jarista geedka. Haddii mulkiiluhu aanu jarin geedka wakhtiga kama dambaysta ah ee la siiyay ama ay doortaan in geedka ay jarto MPRB, MPRB waxay qandaraas ku qaadanaysaa suulinta geedka.

Haddii MPRB ay qandaraas ku qaadato jarista geedka, waxay lacagta siisaa qandaraaslaha marka jarista la xaqiijiyo. Halkaa marka ay marayso, Waaxda Maaliyadda ee MPRB waxa ay soo dirtaa ogaysiis biil oo leh ikhtiyaarka lacag bixinta milkiilaha guriga. Milkiilaha guriga waxa uu si buuxda u bixin karaa lacagta jarista geedka wakhtigaas, waxa uu samayn karaa inuu qayb ka baxsho, ama haraaga aan la bixin ayaa lagu soo dalacayaa qiimayn gaar ah oo ka dhan ah gurigooda muddo shan ama toban sano ah.

Qiimaynta khaaska ah ayaa sanad walba lagu soo dalacaa (ama loo diraa) milkiilaha guriga iyada oo loo marayo bayaanada cashuurta guryaha oo ay soo ururiso Degmada Hennepin. Waxa laga yaabaa in lagu soo daloco muddo shan sano ah ama toban sano ah iyadoo lagu daray lacag dulsaar ah. Dulsaarku wuxuu ku salaysan yahay qiimayaasha dammaanadda qiimaynta gaarka ah. Kuwa u qalma, qiimaynta dib ayaa loo dhigi karaa ilaa guriga la iibiyo.

## Kormeerka Geedka, Kharashka Jarista, Ikhtiyaarada Daawaynta

S: Yaa go'aaminaya in uu geedku buko ama bahalo galeen oona loo baahan yahay in la jaro? Maxay yihiin shuruudaha?

J: Kormeerayaasha Geedka ee MPRB ayaa gaara go'aan ah in geed la jaro. Kormeerayaasha Geedka ayaa shati ka haystaan Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Minnesota waxana loo qiray Bulshada Caalamiga ah ee Dhirta.

S: Waa maxay waxyaabaha go'aamiya kharashka geedka lagu jarayo?

J: Qodobka ugu muhiimsan ee qiimaha waa wakhtiga ay qaadan doonto in geed la jaro. Waxyaabo dhowr ah ayaa go'aamiya wakhtiga geedka la jarayo, oo ay ku jiraan goobta geedka, cabbirka, iyo gaarista geedka. Geedaha ayaa lagu qiyaasi karaa inay yihiin geedo leh "dalab caadi ah" ama "dalab gaar ah".

Milkiilayaasha gurigu waa in aysan u qaadan in geedka uu jaray qandaraaslaha MPRB uu qiima yaraan doono. Iyada oo ku xiran geedka, waxa laga yaabaa in ay ku kharash yartahay mulkiilayaasha guryuhu in ay iyagu iska jaraan geedka ama ay kiraystaan qandaraasle iyaga u gaar ah si uu uga jaro.

S: Waa maxay geedka Dalabka caadiga ah leh iyo geedka Dalabka gaarka lehi?

J: Geedaha Dalabka Caadiga lehi waa geedaha si fudud loogu gaari qalabka loo baahan yahay in meesha loo ga jaro. Geedaha Dalabka gaarka leh waa geedaha aan si fudud loogu gaari karin qalabka loo baahan yahay in meesha looga jaro. Tusaalooyinka geedaha dalabka khaaska lehi waa geedaha u baahan wiish sababtoo ah ma jirto waddo kale oo lagu gaari karo geedka, geed leh sagxad ku wareegsan, ama geed u dhow fiilooyinka korontada ee iskuxiran ama iswada dul/garab socda.

S: MPRB ma kordhisaa kharashka qandaraaslaha ee jarista geedka marka ay biilasha u dirayso milkiilayaasha guryaha?

J: Maya. Milkiilaha guriga waxa loo dirayaa waxa MPRB loogu dalacy jarista geedka, iyadoo lagu daray khidmad dhan $80 si loo daboolo kharashaadka maamulka MPRB.

S: Waa maxay sababta aad u jarayso geedka buka? Waa maxay sababta milkiilaha gurigu uusan isaga dhaafi karin?

J: Maaraynta geedaha buka iyo geedaha bahaluhu galeen ee guryaha sida gaarka loo leeyahay waxay faa'iido u leedahay caafimaadka iyo badbaadada dhammaan dadka deggan Minneapolis. Faa'iidooyinka caafimaadka oo ay ku jiraan tayada hawada oo la hagaajiyay iyo bandhiga hoos u dhigista Kansarka uu keeno shucaaca UV ee ka yimaada qorraxda ayaa laga helaa daboolka balbalada, kaas oo lagu ilaaliyo iyadoo hoos loo dhigayo fiditaanka cayayaanka. Sugitaanka in lagaa jaro geedaha buka iyo kuwa bahaladu galeen ayaa u oggolaanaysaa inay hoos u dhacaan ilaa heer ay noqdaan kuwo khatar ah. Intaa waxaa dheer, iyada oo jaris lagu xakumay geedaha dambaska ah ee sida gaarka loo leeyahay isla marka la ogaado inay bahaladu galaan, geedka waa la jari karaa ka hor inta uusan gaarin xaalad qaabkiisu sii xumaanayo, taas oo si aad ah u kordhisa kharashka jarista.

S: Bal ka warrama dadka guriga ku leh geed dambas ah oo jaris lagu xukumay oo na doonaya inay kiimiko ku daweeyaan? Taas mala dooran karaa?

J: Milkiilayaasha guriga ayaa laga yaabaa inay doortaan inay kiimiko ku daaweeyaan geed dambas ah oo gaar ah. Haddii qandaraasle la shaqaaleysiiyo si uu u sameeyo daawaynta, Qandaraaslaha geedaha ee magaalada Minneapolis-ay ansixisay waa in loo adeegsadaa iyada oo kharashka bixinayo mulkiiluhu. Waa muhiim in la ogeysiiyo MPRB haddii ay dhacdo in wakhtiga jaristu u baahdo in la kordhiyo. Kormeerayaasha geedka ayaa xilliyo ku soo noqon doonaan si loo baaro, haddii cudurku aanu soo roonayn, habka jariin ku xakumista ayaa dib u bilaabmaysa.

## Ikhtiyaarka Lacag-bixinta iyo Dhibaatada Dhaqaale

Marka mulkiilaha gurigu uu ka helo ogaysiiska biilka Waaxda Maaliyadda ee MPRB mulkiilaha guriga ayaa bixin karaa lacagta jarista geedka oo dhamaystiran, bixin kara qayb ka mid ah, ama haraaga aan la bixin ayaa lagu soo rogi karaa qiimayn gaar ah oo ka dhan ah gurigooda muddo dhan shan ama toban sano.

Hoggaanka MPRB ayaa ka dhagaystay bulshada in kharashka jarista geedka jaris lagu xakumay ay keeni kartoo dhaqaale xumo soo wajahda qaar ka mid ah mulkiilayaasha guryaha. Taasi waa sababta MPRB ay hadda u bixiso laba ikhtiyaar ee dhaqaale xumo oo loogu talagalay milkiilayaasha guryaha.

Ikhtiyaar #1 - Barnaamijka Dib u dhigista Qiimaynta Gaarka ah iyo Shuruudaha

Milkiilayaasha guryaha Homestead-ka ee la kulma dhibaato kuwaas oo buuxiya mid ka mid ah shuruudaha hoos ku qoran ayaa dib isga dhigi karaan ama dib u dhigi karaan bixinta qiimeynta jarista geedka. Qiimaynta lama cafin. Qiimaynta waa la qaadayaa, rahmad ayaa looga dhigayaa guriga, haraaga aan la bixinna waxa uu ururiyaa ribo ilaa laga bixiyo. Lacag bixin buuxda ayaa loo baahan yahay marka gurigaa la iibiyo, ama la waayo xaaladda "homestead-ka", ama dhibku meesha ka baxo.

Shuruudaha Degmada Hennepin ee ka qaybgalka Barnaamijka Dib u dhigista Qiimaynta Gaarka ah:

- Dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn
- Dadka u fariistay naafonimo joogto ah iyo mid guud ahaaneedba
- Kaydka militariga oo ku jira waajibaadka shaqo

Ikhtiyaar #2 Ku bixi qiimaynta muddo 10 sano ah (Waxaa heli kara dhammaan milkiilayaasha homestead-ka)

Milkiile kasta oo leh guryaha homestead-ka oo la kulma dhibaato ayaa dooran kara inuu ku bixiyo qiimaynta muddo 10 sano ah halkii uu ka qaadan lahaa heerka caadiga ah ee 5-sano.

Lacagta ayaa lagu dalacaa guriga waxaana laga soo qaadaa degmada Hennepin si ay u qiimeyso cadeynta canshuurta guriga. Qadarka sanadlaha ah ee la bixinayo wuu yaraan doonaa, si kastaba ha ahaatee, wadarta dulsaarka la bixiyay ayaa noqon doonta mid badan.

Labadan doorasho waxaa weheliya $80 oo ah Kharashka Maamulka ee lagu dalaco shaqadan sidoo kale waa laga dhaafi karaa.

S: Waa maxay sababta Guddiga Beeraha aysan kaliya u bixin karin jarista geedaha gaarka ah ee jarista lagu xakumay?

J: MN Statute 18G.13 wuxuu farayaa in mulkiilaha guriga gaarka ahi uu yahay qaybta mas'uulka ka ah kharashyada la xiriira jarista geedka buka ama kan bahaladu galeen.

S: Sidee buu milkiilaha gurigu ku ogaan karaa labada doorasho ee dhaqaale xumo?

J: Tixraaca xulashooyinka dhaqaale xumo ayaa lagu daray websaydka MPRB (www.minneapolisparks.org/trees) waxaana lagu daray ogeysiisyada biilasha ee ay soo dirto Waaxda Maaliyadda ee MPRB.

## Waa sidee geeddi-socodka geedka jarista lagu xakumayo ee Minneapolis marka loo barbar dhigo magaalooyinka ku xeeran

St. Paul, Robbinsdale, Golden Valley, St. Louis Park, Edina, iyo Richfield dhamaantood ayaa ku shaqeeyaan barnaamijka jarista geedka ku yaal guriga gaarka ah oo la mid ah tan MPRB. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan magaalooyinkaas waxay lahaayeen geeddi-socod geedka gaarka ah oo aad u adag (baaritaan/ xukun jaris/qiimeyn) haddii ay heli lahaayeen miisaaniyadda iyo shaqaale si ay u sameeyaan.

Dhowr ka mid ah magaalooyinka ayaa bixiya kaliya 1, 3, iyo 5-sano oo heerar dalacaada. MPRB waa hay'adda kaliya ee bixisa doorasho 10 sano ah. St. Paul ayaa bixisa dib-u-dhigid la mid ah tan MPRB ee milkiilayaasha guryaha u qalma, waxay sidoo kale ikhtiyaar u leeyihiin mulkiilaha guri kasta inuu ka soo qayb galo dhageysiga sharci dejinta, ka marag furo oo caddeeyo dhaqaale xumo (in kiisa qaadhi la hor dhigo) oo ay dib u dhigaan waqti dambe, aw go'aamiyay goluhu, in uusan ka badnaan 10 sano.

## Falanqaynta geedka jarista lagu xakumay ee magaalada oo dhan

Geedka Jarista la xakumay ee MPRB iyo jarista geedaha ku yaal guriga gaarka ah ayaa dhacayeen tobanaan sano. Badanaa, in geed jaris lagu xakumo waxay raacdaa dariiqa ah in cudur kudhoco ama bahallo galaan geedka. Tusaale ahaan, EAB ayaaaa markii ugu horreysay laga helay Koonfur-bari Minneapolis sannadkii 2010. Tan iyo markaas, ayey baabi'isay geedaha dadweynaha iyo kuwa sida gaarka ah loo leeyahay ee guud ahaan xaafad kasta oo ka mid ah 83-da xaafadood ee Minneapolis.

S: Imisa geed oo ku yaal guriga gaarka ah ayaa lagu xakumay jaris, la qiimeeyay, lagana qaadin 20kii sano ee la soo dhaafay?

J: Laga soo bilaabo 2001-dii, waxaa jiray ku dhawaad 38,000 geedaha sida gaar ah loo leeyahay oo lagu xakumay jaris. 38,000, in ka badan 15,000 ma uusan jarin mulkiiluhu. 15,000 oo ay qiimeysay oo ay jartay MPRB, ku dhawaad 8,000 oo ka mid ah qiimayntooda ayaa lagu dalacay mulkiilaha guriga.

S: Intay geedahaasi uga yaalaan Minneapolis?

J: Dhirta sida gaarka loo leeyahay oo jarista lagu xakumay ayaa dhammaan ku yaala 83-ka xaafadood ee Minneapolis.

S: 2022, milkiilayaasha Waqooyiga Minneapolis miyay leeyihiin geedo si gaar loo leeyahay oo ka badan kuwa lagu xakumay jarista marka loo eego qaybaha kale ee Minneapolis?

J: Haa. Sannadka 2022, baarayaasha geedaha MPRB ayaa ka heleen geedo badan oo buka iyo kuwo ay bahalo galeen Waqooyiga Minneapolis. Tan waxaa u sabab ah dhowr sababood:

- Waxay u badan tahay inay jiraan tiro badan oo geed dambas ah oo laga helo guryaha gaarka ah marka loo eego noocyada kale. In kasta oo aynaan hayn tiro-koob ku saabsan noocyada geedaha ka baxa dhulka gaarka ah, waxaan ognahay in ay jireen tiro badan oo geed dambas ah oo lagu beeray dhulka dadweynaha ee Waqooyiga Minneapolis. Waayo-aragnimada MPRB, nooca iyo saamiga geedaha lagu beeray dhulka gaarka ah waxay aad ula mid yihiin kuwa lagu beeray dhulka dadweynaha.
- 2021 kormeerayaasha geedaha MPRB waxay jaris ku xakumeen tiro aad uga badan oo geedo gaar ah oo ku yaal Koonfurta iyo Koonfur-galbeed ee Minneapolis marka loo eego Waqooyiga Minneapolis.

Shantii sano ee la soo dhaafay, geedaha gaarka ah ee jarista lagu xakumay ayaa si isku mid ugu faafay Minneapolis.

S: MPRB ayaa bulshada ka dhagaystay in geeddi-socodka jaris ku kxukumidda geedka gaarka ah uu yahay mid jahawareer ah, iyo in mulkiilayaashu aanay ka warqabin fursadaha dhaqaale xumo. Waa maxay habka hagaajinta ee la qorsheeyay?

J: Shaqada hadda la dhamaystirayo waxaa ka mid ah:

- Cusbooneysiinta websaydka MPRB si ay u noqoto mid si fudud loo isticmaali karo, oo leh macluumaad la ballaariyay oo loogu talagalay milkiilayaasha guryaha
- Ku daridda luqadda ku saabsan fursadaha dhaqaale xumo ee dhammaan ogeysiisyada iyo u dirista mulkiilaha guriga
- In macluumaadka luuqado badan lagu tarjumo
- In la sameeyo qorshe isgaarsiin oo looga faa'iideysanayo warbaahinno badan oo na la gaarsiiyo macluumaadka bulshooyinka ay saameysay